

# MINNESOTA DFL



## VOTER PROTECTION

---

### OGOW XUQUUQDAADA

***Maadaama aad tahay codeeye ah reer Minnesota, waxaad leedahay xuquuq badan—ogow xuquuqdaadu waxa ay tahay!***

- **IN AAD SHAQADA FASAX KA QAADATID SI AAD U CODAYSID:** Waxaad xaq u leedahay in aad fasax shaqada ka qaadatid adiga oo aan lagaa goynayn lacag, fasaxa gaarka ah, ama fasax aad xaq u yeelatay.
- **IN AAD CODAYSID HADDII AAD SAFKA KU JIRTID 8DA FIIDNIMO:** Waxaad xaq u leedahay in aad codaysid haddii aad safka ku jirtid waqti kasta oo ka horeeya 8da fiidnimo.
- **IN AAD ISDIIWAANGELISID MAALINTA DOORASHADA:** Waxaad xaq u leedahay in Maalinta Doorashada aad isdiiwaangelisid si aad u codaysid haddii aad muujin kartid caddaynta loo baahan yahay ee deegaanka.
- **IN AAD HADAL KU SAXIIXDID:** Waxaad xaq u leedahay in aad hadal ku caddaysid qofka aad tahay oo aad qof kale waydiisato in uu adiga kuu saxiixo haddii magacaaga aadan wax ku saxiixi karin.
- **IN AAD CAAWIMAAD WAYDIISATID:** Waxaad xaq u leedahay inaad caawimo qofkasta weydiisato, marka laga reebo wakiilka loo shaqeeyahaaga ama ururkaaga shaqaalaha.
- **IN AAD GOOBTA CODBIXINTA CARUUR KEENI KARTID:** Waxaad xaq u leedahay in aad caruurtaada keento si ay kuula codeeyaan.
- **IN AAD CODAYSID KA DIB MARKAAD DHAMMAYSATO XUKUN DEMBI CULUS:** Waad codayn kartaa ka dib markaad dhammaysato dhammaan qaybaha xukunkaaga, oo ay ka mid yihiin tijaabo dembiile, siidayn waqtigii oo aan la gaarin, ama shuruudo kale sida magdhaw.
- **IN AAD CODAYSID HADDII AAD WALI KAA MAS'UUL AH HOOS JOOGTID:** Waxaad xaq u leedahay in aad codaysid haddii aad wali kaa mas'uul ah hoos joogtid, haddii aan garsoore kaala noqon xaqqa aad u leedahay codbixinta.
- **IN AAD CODAYSID ADIGA OO AAN CODKAAGA CIDI SAAMAYN KU YEELAN:** Waxaad xaq u leedahay in aad codaysid adiga oo aan cid joogta goobta codayntu wax saamayn ah ku yeelan codkaaga.
- **IN LAGUU BEDDELO WARQADDA CODBIXINTA:** Waxaad xaq u leedahay in lagu beddelo warqadda codbixinta haddii aad qalad ku samaysay warqadda codbixinta in taadan sanduukha ku ridin.
- **IN AAD CABASHO GUDBISO:** Waxaad xaq u leedahay in aad cabasho qoraal ah u gudbiso goobtaada codbixinta haddii aadan ku faraxsanayn qaabka doorashada loo maamulayo.
- **IN AAD WADATID TUSAALE AH WARQADDA DOORASHADA:** Waxaad xaq u leedahay in aad tusaale ah warqadda codbixinta la gashid waabta codbixinta.
- **IN AAD WADATID XEERKA XUQUUQDA CODBIXIYAHA:** Waxaad xaq u leedahay in aad nuqul ah Xeerka Xuquuqda Codbixiyaha la gashid waabta codbixinta.

#### **TAARIIKHAHA 2022** **ISDIIWAANGELI SI AAD U** **CODAYSO**

- *Hory isdiiwaangeli ugu dambayn 18ka Bisha 10aad (October) si aad waqti u hesho Maalinta Doorashada.*

#### **MAALINTA DOORASHADA**

- *Talaada, 8da Bisha 11aad (November)*

#### **More Information:**

<https://dfl.org/voterprotection/> | <https://mnvotes.gov> | <https://iwillvote.com/>

1-833-DFL-VOTE